GO'AANADA RASMIGA AH EE KULANKA
GUDIGA DUGSIGA BOSTON

Ogosto 31, 2022

Guddiga Dugsiyada Boston waxay ku qabteen Zoom kulan fogaaneed bishii Ogosto 31, 2022 saacadu markay ahayd 5 p.m. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mid ka mid ah shayada hoos ku taxan, booqo www.bostonpublicschools.org/schoolcommittee, iimayl ugu dir feedback@bostonpublicschools.org ama ka wac Xafiiska Guddida Dugsiyada Boston (617) 635-9014.

KA SOO QEEYBGALAYAASHA:

Xubnaha Guddiga Dugsiga ee soo xaadiray: Gudoomiye Jeri Robinson; Stephen Alkins; Lorena Lopera; iyo Quoc Tran.

Xubinta Guddiga Dugsiga oo Maqan: Gudoomiye ku xigeenka Michael D. O'Neill; Brandon Cardet-Hernandez; iyo Rafaela Polanco Garcia.

DUKUMIINTIYADA LASOO BANDHIGAY

Ajandaha

Ogolaanshaha Deeqaha

Xusuusin: Wargalinta Dib U firitaanka Sanad-Dugsiyeedka 2022-23

Bandhigitaan: Wargalinta Dib U firitaanka Sanad-Dugsiyeedka 2022-23

FURITAANKA KULANKA

Gudoomiye Jeri Robinson ayaashirka furay hormuud ka noqdo ballan qaadka. Marwo Sullivan ayaa dadka yeerisay. Mudane Cardet-Hernandez; Marwo Polanco Garcia iyo Mudane O'Neill ayaa maqnaa. Dhammaan xubnaha kale ayaa joogay.

Marwo Robinson ayaa sheegtay in kulanka caawa si toos ah looga daawanayay Zoom. Waxaa dib looga sii dayn doonaa telefeeshinka Magaalada Boston. Waxaa lasoo dhigi doonaa bostonpublicschools.org/schoolcommittee iyo YouTube. Waxay ku dhawaaqday in adeegyo tarjumaad ah ee isku mar ah lagu heli karo Isbaanishka, Haitian Creole, Cabo Verdean, Vietnamese, Cantonese, Mandarin iyo Luqadda Dhagoolaha Ameerikaanka (ASL) waxayna bixisay tilmaamo ku saabsan sida loo helo turjumaada isku mar ah iyadoo la beddelayo kanaalka Zoom. Dhukumentiyada kulanka oo la turjumay ayaa lasoo dhigay www.bostonpublicschools.org/schoolcommittee kahor inta uusan shirka bilaaban.

Kulanka fog araga ee Guddiga Dugsiga Boston
Zoom

Ogosto 31, 2022

Marwo Robinson ayaa sheegtay inay jiro iyo socdaal awgood, Guddigu aanu haysan tirada loogu talagalay inuu kulanka ku furmo inta uu shirku socdo oo dhan. Si loo fuliyo shaqooyinka muhiimk ah ee Guddiga Dugsiga, waxay soo jeedisay in Guddigu dib u habeeyo ajandaha, una wareejinta cod bixinta bilowga ajandaha. Haddii iyo waqtiga xubnuhu u baahdaan inay baxaan, Guddigu waxay u codayn doonaan in dib loo dhigo shirka, maadaama uusan jiri doonin tiro ku filan oo uu kulanku ku furmo. Marka la eego sida dhakhsaha badan ee shaqada ay degmadu u fulinayso ee loogu diyaar garoobayo dib u furitaanka dugsiga iyo baahida loo qabo in macluumaadkan muhiimka ah lala wadaago daneeyayaasha iyo xubnaha bulshada, xubnaha haray waxay dhegaysan warbixinta Ku simaha Kormeeraha iyo Wargalinta Kusoo Noqoashada Dugsiga. Kuwa isu diiwaangeliyay faalooyinka dad waynaha waxay haystaan ikhtiyaarka ah inay marag furaan caawa ama inay sugaan ilaa kulanka xiga ee sida joogtada ah loo qorsheeyay ee Sebteembar 14, 2022.

Waxyaabaha Waxqabadka

Digtoor Alkins ayaa wax ka waydiiyay dheefaha xubinimada Ururka Gudiyada Dugsiga Massachusetts (MASC). Marwo Robinson iyo Marwo Lopera ayaa ka hadlay dheefaha xubinnimada MASC, oo ay ku jiraan tababaro horumarinta xirfadeed, aqoon-isweydaarsiyo, u doodid, taageero, iyo wargelin bille ah. Marwo Robinson waxa ay u mahadcelisay Madaxweynaha MASC Glenn Koocher sida Guddiga uu si khabiirad leh u maamulay.

La Ogolaaday - Hab yeeritaan ah, Guddigu waxay si aqlibiyad ah u ogolaadeen bixinta khidmadaha xubinnimada ee Ururka Massachusetts ee Guddiyada Dugsiga oo dhan $8,280 Sannad Dugsiyeedka 2022-2023.

La Ogolaaday - Hab yeeritaan ah, Guddigu waxay si aqlibiyad ah u ogolaadeen ogolaanshaha Deeqaha oo wadar ahaan dhan $372,042.

La Ogolaaday - Hab yeeritaan ah, Guddigu waxay si aqlibiyad ah u ogolaadeen mooshin lagu doonayo in shirka lagu hakiyo.

WARBIXINTA KU XIGEENKA KORMEERAHA

** Sida diyaarinta gudbinta.*

Waad mahadsantahay, Marwo Gudoomiye. Waan ku faraxsanahay inaan caawa idinku soo biiro. Ogosto 15, waxaanu soo gudbinay qaybihii ugu horeeyay oo kamid ah Qorshaha Hormarinta Nidaamka (SIP). Tan waxa ka mid ah qabyo qoraalka koobaad ee qorshaha istiraatijiyadeed ee ardayda luuqadaha badan ku hadala, xeerar iyo habraacyo gacan lagu qoray dib loo eegay ee waxbarashada gaarka ah, qaabaynta Tayada Qorshaha Dugsiga ee qorshaynta hormarinta dugsiga, qorshaha dayactirka xarumaha musqulaha ee 16 dugsi, iyo hawlgelinta Golaha Dugsiyada Magaalada Weyn ee dib u eegista dibadeed ee waxbarashada gaarka ah, gaadiidka iyo badqabka ardayda. Dhammaan waxyaabaha aan soo gudbinay waxaa laga heli karaa websaytka BPS www.bostonpublicschools.org/strategicprogress. Kooxda degmadu waxay sii wadaan inay ka qaybgaliyaan shaqaalaha heerka sare ee DESE si ay dib ugu eegaan fikrad celintooda una sameeyaan wax ka beddelitaana inta aanu sii wadno wada shaqaynta nidaamyadan muhiimka ah. Golaha Council of Great City Schools waxay soo gabagabeeyeen booqashadooda ugu horeysay ee goobta si ay u waraystaan daneeyayaasha kala duwan ee waxbarashada gaarka ah. Waxay sii wadi doonaan inay dib u eegis ku sameeyaan dhukumeentiga iyo waraysiyo khadka tooska oo dheeraad ah dhawrka toddobaad ee soo socda, markay soo dhamaystiraan warbixintooda iyo talooyin soo jeedintooda. Waxaan rajeyneynaa inaan talo soo jeedintooda u gudbino Guddiga Dugsiga bisha

Noofambar. Waxaa jiraa waxyaabo dheeraad ah oo ay tahay in lasoo gudbiyo Sebteembar 8, oo ay ku jiraan shaqaaleysiinta jagooyinka muhiimka ah si loo kormeero Nidaamka Xallinta Dhibaatada iyo dib u eegista habraacyada kala laabashada ardayga. Waan ku faraxsanahay inaan kusoo wargaliyo inaan ku talajirno fulinta lahayn ballanqaadyadan, waxaanan mar kale ku dhejin doonaa dhammaan waxyaabaha la gaarsiin karo mareegta BPS, marka loo gudbiyo DESE.

Inta lagu guda jiray kulankeenii u dambeeyay, waxaan ka hadlay maalgelinta aan ku sameynay ciyaaraha fudud. Waqtiga wuu bilaabmay. Mass General Brigham Sports Medicine waxay u fidisay Dugsiyada Dadweynaha Boston baaritaano bilaash oo toos ah Ogosto 13. Taylor Twellman, ciyaaryahan hore oo ka tirsan New England Revolution iyo ciyaar baahiye ESPN Sports, ayaa u yimid inuu la kulmo ardayda.

Waan ku faraxsanahay inaan ka warbixiyo inaan sii waday wargalinta Kormeeraha ee soo socda mashaariicda iyo qorshayaasha soo socda ee sannad dugsiyeedka cusub. Waxay ka qaybqaadanaysay kulano ay la qaadanayso daneeyayaasha muhiimka ah. Waxay samaysay ogaysiisyo muhiim ah oo hogaamineed kuwaas oo aad ku arki doonto boggaga.

August Leadership Institute (ALI) waxaa lagu qabtay Jaamacadda Boston Ogosto 16 ilaa Ogosto 18. Waxaa i sharaf ah inaan salaamo ka soo qaybgalayaasha dhammaan dugsiyadeena maalintii 1aad, oo ay weheliso Guddoomiyaha BTU Jessica Tang, Kormeeraha Guud ee xigga, Guddoomiyaha Guddiga Dugsiga Jeri Robinson iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Dugsiga Michael O'Neill. Saddexda maalmood ayaa diiradda lagu saaray hirgelinta Qorshaha Aqoon loo siman yahay iyo horumarinta tayada Qorshayaasha Dugsiga SY22-23.

Management and Operations Institute waxa la qabtay si khadka tooska ah intii u dhaxaysay Ogosto 22 ilaa Ogosto 24 waxaana ka qeybgalay shaqaalaha dugsiga, hogaanka, iyo maamulayaasha Xafiiska Dhexe. Waaxyo badan oo kala duwan ayaa soo bandhigay dhowr mowduucyo kala duwan kuwaas oo ka caawin doona in aan ogeysiino shaqadeena degmo ahaan sanadka soo socda, oo ay ku jiraan mawduucyada muhiimka ah ee la xiriira Qorshaha Hormarinta Nidaamka -- xeerarka waxbarashada gaarka ah iyo habraaca, Khadka Caawinta BPS, iyo dib u eegista habraacyada cayrinta ardayda, iyo habraacyadayada COVID-19 si aan u magacaabo dhowr.

Xafiiska dhexe ayaa 25 Ogos ku qabtay Bandhigayaga Furan ee Sannadlaha ah, halkaas oo madaxda iyo shaqaalaha dugsiyadu ay booqdeen waaxyaha kala duwan si ay isula kulmaan isu soo salaamaana, sida aad ka arki kartaan sawirada bandhigga.

Shalay waxa aanu ku qabanay xaflada soo dhaweynta ardayda fasalka Xanaanada ee Matxafka Caruurta ee Boston, halkaas oo aanu ku soo dhawaynay caruurta fasalka xanaanada iyo qoysaska oo aanu siinay boorsooyinka dhabarka iyo waxyaabo wanaagsan. Waxaan aad ugu mahadcelineynaa Boston Children’s Hospital, ston Children’s Museum, Cradles to Crayons iyo Xafiiska Duqa Magaalada ee Carruurnimada Hore. Waxay ahayd xaflad aan farxad badan ka helay.

Dugsigu waxa uu bilaabmayaa todobaadka soo socda Khamiista, Siteembar 8, fasalada 1-12 iyo Isniinta, Sebteembar 12, ee fasaladayada K0-K2. Wixii wargalin ah ee ka soo kordha dib ayaan idiin kala soo socodsiin doonaa habeen dambe, balse sida aan ku sheegay kulankeenii u dambeeyay, kooxdani waxa ay dadaal badan ugu jirtay sidii ay wax uga qaban lahayd dhinacyada muhiimka ah ee naga caawin doona in aan si habsami leh ugu gudubno sannad dugsiyeedka.

Sidaad ogtahay, todobaadkii hore, waxaanu qabanay shirkayada jaraa'id anagoo na weheliyo Duqa magaalada oo ku saabsan xiritaanka khadka Orange ka ah. Waxaan rabaa inaan u mahadceliyo Agaasimaha Gaadiidka Del Stanislaus iyo kooxdeeda, kuwaas oo si aan kala joogsi lahayn uga shaqaynayay inay wax ka qabtaan arrimaha gaadiidka iyo dib u cusboonaysiinta, iyagoo kaashanaya

Kulanka fog araga ee Guddiga Dugsiga Boston
Zoom

Ogosto 31, 2022

Duqa magaalada, kooxdeeda, iyo dhammaan shaqaalaha kale ee ku lug leh. Walaacayaga ugu weyni waa hubinta in ardaydeenna iyo shaqaalaheenna ay helaan gaadiid ay ku tagaan si nabdoon dugsiga. Anaga oo kaashanayna ururka darawalada baska dugsiga, waxaan ku heshiinnay in aan u oggolaano degmadu in ay sii haysato baabuurta 7D ee dheeraadka ah ee ardayda, ugu horrayn waddooyinka ka baxsan Magaalada Boston. gawaarida ardayda qaado waxay loo heli doonaa darawalada basaska jaalaha ah ee dugsiga si ay u kordhiyaan tirada basaska laga heli karo gudaha xadka magaalada. In kasta oo xiritaanka khadka Orange ay shaki la'aan kor u qaadi doonto caqabadaha xagga gaadiidka BPS, waxaan ku rajo weynahay in gawaarida ardaydu ay yareeyaan culayska dheeraadka ah ee nidaamka baska jaalaha ah. Waxaan sii wadeynaa inaan u wargalino qoysaskeena toddobaad kasta marka macluumaadka la helo. Shaqaalaha MBTA iyo BPS waxay sidoo kale qorsheyn doonaan inay bixiyaan taageero shaqaale oo dheeraad ah si ay uga caawiyaan hagitaanka ardayda ee wadada baska ee Orange Line. La soco Safiirada Gaadiidka MBTA ee xidha shaadhka polo ee casaanka ah, funaanadaha, ama jaakadaha leh astaanta T waxaana laga heli karaa boosteejooyinka oo dhan.

Waxaan fahamsanahay in tani ay ardaydeenna u noqon doonto waqti dhib badan. Bulshada dugsiyada BPS waxay u adeegaan ardaydeena markay yimaadaan dugsiga, hubinta inay helaan daryeel, waxbarasho, iyo quraac iyo qado caafimaad leh "gambaleelka kadib," iyada oo aan loo eegin dib u dhaca safarka. Ardaydu waa inay qorsheeyaan dib u dhac, halka ay suurtagal tahay, dhistaan wakhti dheeraad ah si ay u tagaan ugana soo baxaan dugsiga. Ardeyda soo daaha gaadiidka awgeed lama ciqaabi doono. Ardayda sida caadiga ah u qaata Orange Line waxay isticmaali karaan adeega baska ee bilaashka ah ee MBTA ee ku socda khadka Orange. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan basaska iyo xarumaha gaadiidka, booqo hagotaanka xiritaanka Orange Line
ee Magaalada. Ardaydu waxay kaloo dooran karaan inay qaataan adeega Tareenka Rakaabka ee bilaashka ah iyagoo si fudud tusaya CharlieCard ama CharlieTicket – xataa haddii kaadhadhku wax qiimo ah lagu darin. Dhammaan goobaha ay ku istaagaan tareenada Rakaabka ee gudaha Boston in laga heli karo ADA. Haddii ay tani tahay markii ugu horreysay ee aad raacdo tareenka rakaabka, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad akhriso bogga gaadiidka Magaalada. Magaalada Boston waxay dhammaan Maktabadaha Dadweynaha Boston ka qaybisaa kaarara CharlieCards si lacag la'aan ah. Haddii safarkaagu uu kugu qaado Orange Line, waxa laga yaabaa inaad tixgeliso waddooyin kale adoo isticmaalaya shabakada baska ama khadadka tareennada kale. Qorsheeyaha Safarka MBTA waxay kaa caawin kartaa inaad hesho xulashooyin kale oo ku meel-gaar ah oo laga yaabo inay ku caawiyaan. Waxaan ku dhiirigelinaynaa ardayda iyo qoysaska inay raacaan ku socdaalidda waddooyin cusub ka hor maalinta koobaad ee dugsiga. BPS waxay u heshay qoysaska 5,000 MBTA Kaarar 7-maalmood ah oo lacag la'aan ah, oo la geeyo dugsiyada degmada. Qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay la socdaan dugsiyadooda si ay u qabanqaabiyaan waqtiyada soo qaadista ardayga. Ardeydu waxay horey u siteen kaadhka xagaaga, waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah ayaa raaci kara iyaga oo isticmaalaya 7-maalmood ee MBTA bilaashka ah. Haddii ilmahaagu u baahan yahay hab tageeritaan, fadlan ku dhiirigeli inay ka wacaan Laynka Caawinta Gaadiidka ee BPS 617-635-9520. Haddii ilmahaagu lumo, waa inay wacaan 9-1-1. Waaxda booliiska Boston qaybteeda dugsigu waxay kala shaqaysaa Dugsiyada Dadweynaha Boston inay u helaan goobta ay joogaan carruurta maqan oo ay ugu keenaan waalidkood, masuuliyiintooda, ama dugsiga sida ugu dhakhsaha badan. Waxaan sidoo kale la wadaagnay ogeysiis shaqaalaha si ay uga caawiso inay ugu adeegaan sidii safiirnimo waqtiyada ugu mashquulka badan waxaana u diri doonaa fariin maalmaha soo socda.

Xafiiskayaga ka qaybgalka bulshada ayaa fududayn doona laba kulan oo dhanka khadka tooska ah si loo baro kormeeraha guud ee imanaya oo aanu la wadaagno qoysaska sida aanu ugu diyaargarownay inaanu caruurtooda ku soo dhawayno dugsiga. Kuwaas waxaa lagu xayeysiiyaa iyada oo loo adeegsanayo wicitaanada robotka, fariimo qoraallo ah, iimaylo, iyo wargeyska waalidka ee toddobaadlaha ah. Midka hore waa berri 6 pm, midka labaadna waa Sabtida, Sebtember 10, 10 am. Waxaa jiri doona wargalin ku saabsan dib u cusboonaysiinta xarumaha la sameeyay xagaaga, habraaca COVID-19 oo la cusboonaysiiyay, macluumaadka gaadiidka, iyo wax badan. Laynka Caawinta cusub ee BPS waxay si

firfircoon u taageeraa qoysaska iyada oo loo adeegsanayo nidaamka dib ugu soo noqoshada dugsiga. Kooxdu waxaa soo galay ku dhawaad 2,200 oo wicitaan, wicitaan iyo wax ayaga weceenba labadaba. Toddobaadkii u dambeeyay, kooxdu waxay u soo bandhigtay dugsiyada waxyaabo ku saabsan laynka caawinta cusub waxayna bilaabeen inay la wadaagaan xayaysiinta qoysaska iyo dhigooda bulshada lambarka taleefanka iyo cinwaanka iimaylka. Kooxda Ka qaybgalinta Qoyska waxa ay marti-qaaday laba "Kulammo oo ay ka qaybgaleen Qoysaska BPS." Midka hore waxaa kasoo qeybgalay 461 ka qaybgalayaal!

Waxa kale oo aan rabay in aan la xiriiro in aan qorshaynayo in aan siiyo warbixin ku saabsan Guddida Dugsiyada Boston iyo bulshadeena kulanka Mission Hill Sebteembar 14 SC. Waxaan rajeynayaa inaan ku siiyo warbixin ku saabsan sida uu ahaa bilaabitaanka dugsigu iyo warbixin ku saabsan horumarkayaga maaraynta dhinacyada kale ee danaha marka ay soo baxaan. Mahadsanid.

Dr. Alkins ayaa waydiiyay sida kooxaha bulshada loogu soo xushay nidaamka DESE SIP. Dr. Echelson waxay sheegtay in BPS iyo Golaha Council of Great City Schools ay kulamo la yeelanayaan daneeyayaasha dibadda iyo qareenada kooxaha si ay u ururiyaan jawaab-celin si ay uga caawiyaan inay u sheegaan talooyinkooda qeyb badan oo shaqo oo muhiim ah.

Dr. Echelson ayaa u xaqiijisay Marwo Robinson in BPS ay yeelan doonto shaqaale luuqado badan ku hadla oo la geeyo xarumaha MBTA. Agaasimaha gaadiidka Delavern Stanislaus ayaa sheegay in 429 qoys inay iska diwaan galiyeen adeega baska jaalaha ah inta lagu guda jiro xiritaanka Orange Line. BPS waxay kordhinaysaa wadooyinka basaska oo loogu talagalay dugsiyada ay saamaynta ugu badan ku yeelatay xiritaanku, sida Charlestown High School.

FAALLO GUUD EE DADWEYNAHA

- Vernee Wilkinson, oo aan deganayn Boston, ahna shaqaalaha SchoolFacts Boston, ayaa akhriyay go'aano ku saabsan jawaab celinta ardayga iyo waalidka.
- Robert Jenkins, degan Mattapan ahna qareen bulsho, ayaa ka marag kacay xiritaanka Orange Line
- Sharon Hinton, degan Hyde Park oo ahna qareen, ayaa ka marag kacay dib u furitaanka dugsiga
- Lauren Peter, oo degan Roslindale kana tirsan waalidka Sumner Elementary School, ayaa la wadaagay walaaca ku saabsan isku darka la soo jeediyay ee u dhexeeya dugsiyada Sumner iyo Philbrick.
- Shery Keleher, oo degan Charlestown kana tirsan waalidka BPS, ayaa ka marag kacay dib u furitaanka dugsiga

Dadka soo socdaa waxay ka marag kaceen talaabooyinka caafimaadka iyo badqabka COVID:

- Nancy Lessin, degan Jamaica Plain, xubin ka ah Qoysaska BPS ee Badqabka COVID (FamCOSa)
- Julia Raifmanm Brookline oo degan ahna barafasoor ku takhasusay caafimaadka bulshada ee Jaamacadda Boston
- Elise Pechter, oo dagan Jamaica Plain kana mid ah xubnaha FamCOSa
- Cheryl Buckman, oo dagan Koonfurta Boston kana mid ah xubnaha FamCOSa
- Suleika Soto, oo dagan South End resident kana mid ah xubnaha FamCOSa

Warbixin

Kulanka fog araga ee Guddiga Dugsiga Boston
Zoom

Ogosto 31, 2022

Soo Bandhigida Ku soo laabashada Dugsiga ee Sanad Dugsiyeedka 2022-2023 - Dr. Echelson iyo kooxdiisa hogaanka sare waxay soo bandhigeen guudmar ku saabsan horumarka degmada iyo qorshayaasha bilawga adag ee sanad dugsiyeedka 2022-2023 ee ardayda, qoysaska iyo shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS). Dr. Echelson waxay sheegtay in iyada oo caqabadaha shaqaalaynta iyo gaadiidka ay weli jiraan, in BPS ay si wanaagsan ugu diyaar garoobeen bilaw xoogan ee sannad dugsiyeedka cusub.

Shaqaalaysiin: Darawalada baska iyo kormeerayaasha, shaqaalaha adeegga cuntada iyo qaar ka mid ah xirfadlayaasha ayaa ah boosaska ugu sarreeya ee aan loo baahanahay in la buuxiyo. BPS waxay ka shaqeyneysaa inay dhiirigeliso jagooyinka darawalka baska iyo kormeerayaasha baska iyo sameynta qorshooyin kadis ah si loo hubiyo in ardayda loo xilsaaray kormeerayaasha ay helaan adeegyada lagama maarmaanka ah. Shaqaalaysiinta macalimiin saynis sare iyo macalimiinta ESLka ayaa iyana ahayd mid caqabad ah. Iyadoo dhowr dugsi ay hadda ka shaqaynayaan inta badan boosaska macallimiinta banaan, laakiin degmadu waxay si dhow ula shaqaynaysaa dugsiyadan si ay u shaqaalaysiiso shaqaalaha loo baahan yahay maalinta koobaad ee dugsiga.

Gaadiidka: BPS waxay sii wad i doontaa inaan ka faa'ideysano Heshiiska Gorgortanka Wadajirka ah ee aan la leenahay Ururka Darawaliinta, kaas oo siinaya fursado cusub oo si wanaagsan loogu adeego ardaydeena. Shaqalaha waxay markasta ka shaqaynayaan dhigooda shaqaalaha Magaalada iyo MBTA si aan isaga kaashano oo aan u dhino carqaladeynta inta lagu jiro xiritaanka Orange Line ee aan horay loo arag ee gobolka, BPS waxay sii wadeysaa hormarinta wax ku oolnimada hawlahaas taas oo ka caawin doonta in ardaydeenna ay dugsiga ku tagaan si badqab leh iyo waqtigii loogu talagalay. Kooxda Gaadiidka ee BPS waxay sii wadaan inay ka shaqeeyaan habaynta iyo shaqada baska, shaqaaleysiinta adeega macaamiisha, iyo diyaargarowga barxadda baska.

Adeegyada Cuntada iyo Nafaqada: BPS waxaa ka go'an inay taageerto koriinka ardayda iyo guusha tacliineed iyadoo siinaysa cunto nafaqo leh iyo khibradada wanaagsan cunista cunto. Ardayda dugsiyada ee la kulma caqabadaha shaqaalaysiinta sanadkan waxay heli doonan cunto caafimaad leh, oo looga iibiyay iyada oo loo marayo qandaraaska cusub oo ay la galaan City Fresh Foods, Roxbury, ganacsiyada ay leeyihiin dadka Madowga ah oo diyaariya cunto cusub oo la sameeyay iyadoo la isticmaalayo maaddooyinka gudaha laga keeno.

Xarumaha: Si loo hubiyo sanad dugsiyeedka guul leh, mid kasta oo ka mid ah xurumaha dugsiyadeena waa inay ahaadaan kuwo badqab iyo soo dhawayn leh. Xagaagan, dugsiyadeenu waxa ay sameeyeen nadiifin iyo jeermis dilitaan toto-dheer iyo sidoo kale horumarino badan oo gudaha iyo dibadda ah. Waxa kale oo aanu dhamaynay dhawr mashruuc oo dib u cusboonaysiin dugsi ah, balaarin iyo casriyeyn kale oo ay ku jiraan goobaha banaanka iyo gudahaba sida musqulaha, goobaha laga soo galo, goobaha baabuurta la dhigto iyo garoommada ciyaaraha.

Meelaynta/La xiriirida iyo Ka qeybgalinta Ardayga: Laga bilaabo Ogosto 24, wadar dhan 50,980 arday ayaa laga diiwaan geliyay dugsiyada BPS. Tiradani way isbedbedeli doontaa markay ardaydu sii wadaan isdiiwaan galinta ama ka noqoshada. Wadarta diiwaangelinta rasmiga ah waxay diyaar noqon doontaa Oktoobar 1. Shaqaalaha waxay sii wadaan inay wacaan qoysaska ku jira liiska sugitaanka ee dugsiyada leh ruqsad banaan. Dadaalka wacyigelinta qoyska iyo bulshada ayaa socda waxaana ka mid ah horumarinta diiwaangelinta ardayda. Khadka Caawinta cusub ee BPS waa uu shaqaynayaa, waxaana barnaamijka Tirinta Sannadlaha ee Carruurnimada Hore si buuxda u socdaa 30 dhacdo oo xaafadaha ah iyo Dabaaldegga magaalada oo dhan Talaadada, Ogosto 30. BPS waxay sidoo kale martigelinaysaa laba kulan oo khadka tooska ah ee ku soo Laabadashada Dugsiga si ay qoysaska u siiso fursad ay kula kulmaan Kormeeraha cusub oo ay wax badan uga bartaan sida ay BPS isugu diyaarinayso dugsiyo

dhammaan ardaydeena. Kulamada waxaa loo qorsheeyay Khamiista, Seebteembar 1 saacada markay tahay 6 p.m iyo Sabtida, Seebteembar 10 saacada markay tahay 10:00 a.m.

Qorshaynta iyo u Diyaar garawga COVID-19: Dhamaan kooxaha isku dhafan ee BPS iyo wakiilada Guddiga Caafimaadka Dadweynaha Boston waxay kulmaan saddex maalmood todobaadkii si ay u hubiyaan inaan ku soconno wadadii dhammaan qorshaheena COVID-19 ee bilowga dugsiga. Qorshaynta waxa ka mid ah baaritaanada ardayda iyo shaqaalaha, fidinta todobaadlaha ah ee baaritaanka guriga, baarista calaamadaha, xarumaha tallaalka iyo waxbarashada, iyo siyaasadayada xirashada maaskarada. Waxaan sidoo kale diiradda saareynaa hubinta in dugsiyadu helaan hao tayo leh iyo hawo siinta iyo hawlgalinta sifeeyaasha hawada iyo dareemayaasha tayada hawada.

Tacliimeed: Sagaalka gobol ee dugsiyadayada iyo kormeeryayaasha guud ee dugsiyadu waxay diyaar u yihiin inay dib ugu soo dhaweeyaan ardayda fasalada oo ay siiyaan taageerooyin macalimiinta iyadoo Diirada la saarayo Waxbarasho loo siman yahay. Taageero ayaa loo diyaariyaa ardayda naafada ah iyo ardayda barta luqadaha badan. BPS waxay Bariga Boston ka samaysay qiimayn degdeg ah ku meel gaar Qiimaynta Ardayda Cusub iyo Xarunta La-talinta waxayna hadda cusboonaysiinaysaa Nidaamka Waxbarashada Gaarka ah iyo Buugga Habraaca. Heshiiska cusub ee gorgortanka wadareed ee Ururka Macallimiinta Boston waxay u ogolaanaysaa degmadu inay hore ugu socoto si gardarro leh oo fikir leh shaqadeeda u dhanaanshaha. Kooxda koobaad ee 20-25 dugsi waxay u abuuri doonaan qorshayaal ka mid ah dugsiyadooda iyo kooxuhu waxay ka hadli doonaan caqabadaha nidaamka iyaga oo noqon doona kuwo ka dhex muuqda dugsiyadooda gaarka ah.

Dr. Alkins ayaa wax ka waydiiyay sababaha ka dambeeya boosaska shaqaale ee bannaan. Madaxa Ku meel-gaarka ah ee Madaxa Shaqaalaynta Rae Cathings ayaa soo xigtay isbeddellada waddanka oo dhan ee ay ku adag tahay shaqaaleysiinta macallimiinta, soo kabashada faafa, iyo dabeecadda dabiiciga ah sababaha ugu waaweyn ee boosaska bannaan. Waxay dhahday in BPS ay si hal abuur leh ula shaqaynayso la-hawlgalayaasha diin ahaaneed iyo kuwa hawlgabka ah si ay u qoraan shaqaale cusub. BPS waxay ka fikirayaan inay u soo bandhigaan gunnooyinka soo bandhigidda iyo haynta ee kormeerayaasha baska. Dr. Echelson waxay sheegtay in BPS ay ogolaansho ka raadinayso Magaalada si ay uga dhaafto shuruudaha deegaan ahaaneed ee boosaska ay adagtahay in la buuxiyo sida kormeerayaasha baska iyo shaqaalaha adeega cuntada.

Dr. Echelson ayaa u xaqiijiyay Ms. Robinson in BPS ay si wanaagsan ugu diyaargarowday hirgelinta shuruudaha qalin-jabinta MassCore.

Dr. Akins waxa uu waydiiyay sida dugsiyada helay dib u cusboonaysiinta loo soo xushay. Agaasimaha xarumaha Brian Forde ayaa sharaxay in agabka qorshaynta sinaanta jinsiyada ee BPS iyo Tusmada Fursadaha laga tixraacay shaashada hore BPS si loo hubiyo sinaanta ee mudnaan siinta.

Dr. Alkins ayaa wax ka waydiiyay wada shaqaynta degmadu la leedahay Gudiga Caafimaadka Dadweynaha Boston ee ku saabsan qorshaynta COVID. Lataliyaha sare Megan Costello ayaa sharaxay habka isku dhafan ee degmada ee borotokoolka caafimaadka iyo badqabka. Bogga websaytka caafimaadka iyo badqabka BPS iwaxaa ku jirto Su'aalaha Inta badan La Isweydiiyo ee ku saabsan COVID-19 iyo sidoo kale tilmaamaha Busbuska.

Digtoor Alkins waxa uu wax ka waydiiyay dadaalka degmadu ku doonayso in ay shaqaaleysiiso macalimiin tacliimeed. Kalkaaliyaha Kormeeraha Guud
Xafiiska Tacliinta iyo Waxbarashada Xirfadlayaasha Dr. Christine Landry ayaa sheegtay in inkasta oo caqabado shaqaaleysiin ay jiraan, gobol kasta la siin doono tababare aqoon leh oo loo siman yahay iyo qof baahidooda wax ka qabta.

Ogosto 31, 2022

Marwo Robinson waxay codsatay cusboonaysiinta shaqooyinka banaan ee adeegyada badqabka. Madaxa Adeegyada Badqabka Neva Coakley Grice ayaa sheegtay in waaxdu ay ku foogan tahay shaqaalaysiinta iyo keenista shaqaale cusub oo badqab ahaaneed.

Ms. Robinson waxay waydiisay sida dugsiyada gaarka ah ay ula socdaan xogtooda. Ku xigeenka Kormeeraha Guud ee Hawlgalinta Sam DePina ayaa sheegay in koox isku-dhafan oo ka kooban in ka badan 40 waax oo ay hogaaminayaan Qaybta Dugsiyadu ay ka shaqaynayaan sidii ay u taageeri lahaayeen hoggaamiyeyaasha dugsiga. Wuxuu sharraxay sida qaab-dhismeedka cusub ee gobolku uu si kobcin doono taageerida dugsiyada.

Dr. Alkins waxa uu waydiiyay istaraatiijiyadaha lagu buuxinayo jagooyinka macalimiinta luuqadaha badan ku hadla iyo macalimiinta waxbarashada gaarka ah.

Dr. Echelson ayaa sheegtay in degmadu ay diiradda saarayso dugsiyada gaarka loo leeyahay iyada oo u adeegsanaysa agabka si xadgudub ah. Waxa uu kalsooni ka muujiyay in BPS ay awood u yeelan doonto in ay ka soo baxdo yoolalka ay dejiyeen DESE iyo Waaxda Cadaaladda, isaga oo intaa ku daray in degmadu ay si wanaagsan ugu diyaargaroob tahay waxqabadka baska ee wakhtiga loogu talagalay iyo kordhinta helitaanka waxbarasho tayo sare leh.

XIRITAANKA

Iyadoo Guddiga Dugsigu mar horeba u codeeyeen in la hakiyo kulanka mar hore fiidkii, Guddoomiye Robinson wuxuu xiray kulan qiyaastii 7:37 p.m.

Attest:

Elizabeth Sullivan
Xoghayaha fulinta